Ku soo dhawaynta wanaagsan ee caruurta labada luqadood ku hadasha xarumahaha caruurta ee Hedensted Kamuune

Horudhac: Waxaanu aad u jecelnahay inaan adiga & ilmahaagaba ku soo dhawayno xarumaha caruurta ee Hedensted kamuune, halkaas oo aan idinku soo dhawaynayno inaan idiin hayno caruurtiina maalinkii.

Waxaa muhiim noo ah, inaad ka waalid ahaan dareemaysaan soo dhawayn & in imahiinu ay helaan xarun wanaagsan oo lagu hayo.

Waxaan aaminsanahay kalsooni wanaagsan inay abuuri doonto wada shaqayn wanaagsan, taasoo ka dhigayso in ilmahu si fiican wax u bartaan una barbaaraan. Wada shaqayn wanaagsan waxay naga caawin inaan si wada jir ah u cawino caruurta, oo aan u barbaaarino

Maalin wanaagsan & bay baay:

Markaad keento caruurtaada xarunta xanaaanada ama aad u keento qofka kuu haya, waxaa muhiim ah inaad salaanto qofka aad u keentay, oo aad ku tidhaahdo maalin wanaagsan. Markaynu isa salaanu, waxaa suurta gal kuu noqonaya inaad sheegto waxa uu dareemayo ilmahaaga, iyo waxa uu la kulmay, taasna waxay naga caawinaysaa inaan fahano baahida ilmaha. Siddoo kale waa muhiim inaad ku tidhaahdo ilmahaaga maalin walba markaad keento baay baay markaad ka tagayso, sidoo kale markaad qaadanayso ilmahaaga waa inaad ku tidhaahdo shaqaalaha xarunta baybaay, markaa shaqaaluhu waxay kuu sheegayaan xaalada ilmahu siday ahayd intuu la joogay

Nolol maalmeedka xarunta:

Maalin walba waxaa loo qorsheeyay hab loo diyaariyay, caruurtu waxay soo galayaan waqti hore subaxii, waxaa la siinayaa quraac. Ka dib waxay samaynaan nashaadaad kala duwan, waxayna ku ciyaarayaan gudaha & banaankaba. Ka dib waxaa la gaarayaa waqtiga qadada, halkaasoo caruurtu ay wada qadaynayaan. Caruurta waxaa lagu tababaraa inay kaligood cuntada cunaan, siddoo kale waxaa la baraa in ay ka qayb qaataan diyaarinta miiska cuntada lagu cunayo, isla markaana waxay ka qayb qaataan aruurinta alaabta cuntada ka dib qadada, ka dib caruurtu waxay ku ciyaaraan banaanka. Caruurta yaryar waa la seexiyaa hadday u baahdaan seexin. Caruur badan waxaa la seexiyaa qolol loogu tala galay, qaarna waxaa lagu seexiyaa firaashyo. Caruurtu markay gaaraan 3 sanno inta badan baahida hurdada maalinta hoos ayay u dhacdaa.

Joogida banaanka:

Caruurta banaanka ayaa la geeyaa, si ay ugu cayaaraan dabeecada iyo meelaha loogu tala galay ciyaarta caruurta maalin walba. Taasi micnaheedu waxaa weeye, in caruurtiina ay wataan dhar iyo kabo fiican oo ay ku ciyaari karaan banaanka, xitaa marka roob da'ayo ama baraf uu dhacayo. Maadaama, mararka qaarkood uu dharka ka qoyi karo caruurta ama ka wasakhoobi karo, waa inuu jiraa dhar u yaala xarunta oo loogu badelo. Meelaha qaarkood ee caruurta la geeyo, waxaa joogi kara xayawaanaad sida bakayle, adhi ama mukulaalo. Caruurta lama geeyo meel uu eey joogo.

Luqada iyo waxbarshada

Luqada caruurta kor ayay u socotaa oo u horumartaa sanadada ugu horeeya, caruurtiinana waxay baranayaan luqad ku cusub. Caruurtu inay si fiican u yaqaanaan luqadooda hooyo, waxay u fududaynaysaa inay si dhakhsa ah u bartaan luqada daanishka. Si ay ilmahu u bartaan luqada waa inaad kula hadashaan luqadiina hooyo guriga markay idinla joogaan, shaqaalaha xarumahana waxay kula hadlayaan caruurta luqada daanishka. Aad bay muhiim u tahay in ilmahu uu idinkula hadlo luqadiina hooyo, oo uu idiinku sheego dareenkiisa ka waalid ahaan, caruurta kale iyo shaqaalaha xarunta ayuu kula hadlayaa luqada daanishka, halkaas ayuuna ka barnayaa luqada daanishka

Ilmahu inta uu joogo xarunta ama meesha lagu hayo wuxuu bartaa waxyaabo badan oo cusub, waxaa ka mid ah waxyaabaha uu barto sida cuntada loo cuno, sida loo ciyaaro, sida dharka loo xirto iyo sidda caruuraha kale loola wada ciyaaro, oo ciyaarta loo qaybsado. Markastoo caruurta ay soo waynaadaan waxay baranyaan waxyaabo cusub, oo waxay bilaabayaan inay yeeshaan waxyaabo ay xiiseeyaan oo ay jeclaadaan inay helaan ama sameeyaan. Markasta waxaan diyaar la nahay inaan caawino caruurtiina, wax barno, oo aan hormarino, waxaana u samaynayaa nashaadaad kala duwan maalin walba.

Caawinaad khaas ah ama dheeri ah:

Haddii ilmihiinu u baahan yihiin caawinaad dheeri ah am mid khaas ah koritaankiisa, waxaan diyaar idiinla nahay inaan idinla raadino meesha looga heli karo caawinaad sax ah. Waxay noqon kartaa in lala xidhiidho tusaale ahaan kormeere caafimaad, macalin luqadeed ama la taliye bulshadeed.



Is diiwaan galinta:

Caruurta da'doodu tahay 0-2 sanno waxaa haya qof caruurta haya ilaa saddex caruur ah ama waxaa lagu hayaa qolka caruurta yaryar ee xanaanada caruurta, halkan waxaa lagu hayaa 8-12 caruur ah. Caruurta da'doodu u dhaxayso 3-5 sanno, waxaa lagu hayaa xanaanada caruurta, qol kasta oo ka mid ah xarunta xanaanada waxaa lagu hayaa 18-20 caruur ah. Ilmuhu marka uu bilaabayo xarumaha caruurta lagu hayo, waxaad helaysaan warqad lagaaga soo dirayo meeesha caruurta laga diiwaan galiyo(Pladsanvisning). Ka hor inta uusan ilmahu bilaabin meesha lagu haynayo, waxaa lala sameeyaa waalidka ilmaha kulan uu la yeelanayo meesha lagu haynayo ilmaha, kulanka oo looga hadlayo wadashaqaynta waalidka iyo xarunta ama qofka haynayo ilmaha. Taariikhda kulanka uu dhacayana waxay ku qoran tahay warqada laguu soo diray iyo in uu joogi doono tarjubaan kulanka. Kulanka waxaa looga hadlaa waxyaabaha muhiimka ah, sida waqtiyada la furo xarunta, cuntada & dharka ilmaha meesha loo dhigo oo kale. Siddoo kale waxaan jecelnahay inaad nooga sheekaysaan ilmahiina, si ay wada shaqaynteenu u fiicnaato.

Aad baan oogu faraxsanahay inaan idinla kulano.

Waxaad nagala soo xiriiri kartaan: